# Unugga Xasilinta Dhibaatooyinka Gobolka Bari

Degmada San Diego waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqdo qorshayaal cusub oo loogu talagalay **Unugga Xasilinta Dhibaatooyinka Gobolka Bari (East Region Crisis Stabilization Unit, CSU).** CSU-ga cusub waa qayb ka mid ah adeegyo caafimaad maskaxeed oo si gobol ah loogu qaybiyay guud ahaan Gobolka San Diego, taasoo u suurtagelinaysa dadka Gobalka Bari (East County) inay helaan daryeelka ay u baahan yihiin.

## Guudmarka Xarunta

| | |
|---|---|
| **Ujeedada** | Waxay bixisaa taageero iyo adeegyo daaweyn caafimaadka maskaxda ah oo degdeg ah, kuna dhacaya jawi deggan, looguna talagalay dadka waaweyn ee leh baahiyo caafimaad-dabeecadeed oo culus, kuwaas oo u baahan daryeel degdeg ah oo ka sarreeya waxa ay bixin karaan adeegyada caafimaad ee bukaan-socodka. |
| **Adeegyada** | Adeegyada waxaa loo habeeyay qof kasta waxaana la bixiyaa waqti gaaban, ilaa 24 saacadood, waxaana ka mid noqon kara:<br>• Faragelinta dhibaatada degdega ah<br>• Qiimeynta caafimaadka maskaxda<br>• Caawinta daawooyinka<br>• Daaweynta iyo taageerada asxaabta<br>• Kheyraad iyo xiriirinta adeegyada caafimaad-dabeecadeed ee socda |
| **Helitaanka Adeegyada** | Waxay aqbashaa keenista hay'adaha caafimaadka, badbaadada, iyo booliska ama ayadoo loo marayo dadka waa weyn oo da'doodu tahay 18 iyo wixii ka weyn. |

## Goobta

Xaruntu waxay ku taallaa El Cajon, ee 200 S Magnolia Avenue iyo West Douglas Avenue. Goobtu waxay u dhowdahay gaadiidka dadweynaha iyo waddooyinka waaweyn si fudud loo helo, iyo adeegyada kale ee caafimaadka dhaqanka ee Gobalka Bari si loogu xiro taageero joogto ah ama daaweyn.



*Sawir ka mid ah CSU ee Gobolka Bari*

## Macluumaad Dheeraad ah

Baar koodhka QR-ka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CSUs iyo inaad aragto su'aalaha inta badan la isweydiiyo. Iimayl u dir **Engage.BHS@sdcounty.ca.gov** haddii aad su'aalo ama faallooyin qabto.

*La cusbooneysiiyay 12/22/25*

## Ku xir Kheyraadka

**Wac 888-724-7240** si aad ula xariirto **Khadka Khalaasadaha iyo Xiriirka ee San Diego (San Diego and Crisis Line)** si aad u hesho taageero bilaash ah oo qarsoodi ah iyo caawimaad ku saabsan hagidda adeegyada, oo la heli karo 24/7 in ka badan 200 luqadood ah.

**Wac 988** si aad ula xariirto shabakadda **qaranka ee Khadka Khalaasadaha iyo Isdilka (Suicide and Crisis Lifeline)** ee xarumaha wicitaanka degdegga ah.